# KAAMERADA MUUQAALKA AH EE BASASKA ISKOOLKA

Gudiga waxbarashada waxay aqoonsan tahay mas'uuliyada ka saaran ilaalinta iyo hagaajinta anshaxa, iyo inay hubiso amaanka iyo daryeelka ardaydeeda iyo shaqaalaheeda iskoolka ee saran gaadiidka iskoolka.

Ka dib markii ay si taxadar leh u tixgeliyeen iyo ay isu dheelitireen xuquuqda sirta ah iyo waajibaadka Degmada si loo xaqiijiyo anshaxa, caafimaadka, daryeelka iyo amaanka shaqaalaha iyo ardayda gaadiidka iskoolka, Gudiga woxoo taageeraa isticmaalka kamaradaha fiidiyowga ee basaska iskoolka.

Kaamirooyinka fiidyowga ah ayaa loo isticmaali doonaa si loola socdo hab dhaqanka gaadiidka iskoolka ee ardayda u soo qaadida iskoolka ama hawlaha manhajka ka baxsan. Barnaamijkaan waxa oo waafaqsan yahay siyaasada Qiimaha Degmada, taas oo sheegayso in ixtiraamka dadka kale, naxariista iyo daryeelka iyo wada shaqaynta ay muhiim u tahay in lagu daydo iyo qaabeeyo dabeecadaha saameeyo tayada nolosha qofka.

Ardayda ku xad gudubto xeerarka anshaxa baska waa in laga qaadaa talaabo anshaxeed sida waafaqsan nidaamka iyo xeerarka gudiga ee maamulo anshaxa iyo edebta ardayga.

Degmada waa in ay u hogaansantaa dhamaan sharciyada gobolka iyo dawlada dhexe ee laxiriiro diiwaanada ardayda marka duubitaanada loo tixgeliyo sii haynta qayb ka mid ah diiwaanka ardayga.

Kormeeraha guud ee iskoolada waxoo sameeyay xeerar maamul iyo habraacyo lagu rakibo kamaradaha muuqaalka basaska iskoolka iyo sidoo kale isticmaalka filimada. Duubitaanka fiidiyowga waa in loo adeegsadaa ujeedada cadaynta edbinta ardayda. Si kastaba ha ahaatee, Degmada waxay u isticmaali kartaa duubitaanadaan ujeedooyin kale ay u aragto inee ku haboon tahay.

| | |
|---|---|
| Tixraac aan Toos aheyn: | Diiwaanada Iskoolka Degmada (1120)<br>Waxbarashada Madaniga ah (4311.2) |
| Tixraac: | 20 USC §1232g (FERPA)<br>Sharciga Fanka & Dhaqanka, Fanka. 57-A (Sharciga Diiwaanka Dawlada Hoose)<br>Sharciga Saraakiisha Dadweynaha §87<br>8 NYCRR Qaybta 156.9(d)<br>Diiwaanada Haynta & Jadwalka Dejinta Isticmaalka Degmooyinka Dugsiga, Jadwalka ED-1 (1991) |

Maarso 23, 2023

| | |
|---|---|
| Qoraal Xassus: | Siyaasadii hore, Buuga Siyaasada, Siyaasada Fiidiyowga (Febraayo 2, 1995); Dib loo eegay Agoosto 20, 1998; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 555 |

ct/sg